

MINNESOTA DFL



VOTER PROTECTION

SIDA LOO CODEEYO

YAA CODAYN KARA?

- Si aad Minnesota uga codayso, waa in aad tahay muwaadin Maraykan ah, ugu yaraan jira 18 sano Maalinta Doorashada, aadna deganayd Minnesota ugu yaraan 20 maalmood.
- Haddii dembi culus lagugu xukumay, waad codayn kartaa ka dib markaad dhammaysato dhammaan qaybaha xukunkaaga, oo ay ka mid yihiin tijaabo dembiile, siidayn waqtigii oo aan la gaarin, ama shuruudo kale sida magdhaw.
- Waad codayn kartaa adigoo wali hoos jooga/kaa mas'uul yahay, haddii aan garsoore kaala noqon xaqqa aad u leedahay codbixinta.

ISDIIWAANGELI SI AAD U CODAYSO

- Waa in aad ka diiwaangashan tahay cinwaankaaga hadda si aad u codayso. Si aad isu diiwaangeliso ama diiwaangelintaadii hore wax uga beddesho, tag mnvotes.org
- Sidoo kale waxaad iska diiwaangelin kartaa meesha doorashadu ka dhecaayo ee deegaankaaga Maalinta Doorashada. Waa in aad tustaa caddayn ah magacaaga iyo cinwaankaaga hadda. Wixii faahfaahin ah, booqo mnvotes.org ama wac 1-877-600-VOTE.

WAXA AAD SOO QAADANAYSO

Haddii aad ka diiwaangashan tahay in aad ka codayso cinwaankaaga hadda, uma baahnid in aad la timaadid aqoonsi. Haddii aad u baahan tahay in aad isdiiwaangeliso ama diiwaangelintaadii hore wax ka beddeshid, waad u baahan doontaa in aad tusto caddayn deganaanshahaaga ah intaadan codayn. Haddii aad rabto in aad ogaato wax intaa ka badan, booqo mnvotes.org ama wac 1-877-600-VOTE.

HORAY UGU CODAY WARQADDA CODBIXINTA MAQANAHA

Horay ayaad uga codayn kartaa xafiiska doorashooyinka ee deegaankaaga laga bilaabo Jimce 21ka Bisha 9aad (September). Waxaad kaloo codsan kartaa in boosta laguugu soo diro warqadda codbixinta maqanaha. Si aad u heshid xafiiska doorashooyinka ee deegaankaaga ama aad u codsatid warqadda codbixinta maqanaha, booqo mnvotes.org

TAARIIKHAHA

2022

ISDIIWAANGELI SI AAD U CODAYSO

- Hory isudiiwaangeli ugu dambayn 18ka Bisha 10aad (October) si aad waqti u hesho Maalinta Doorashada

MAALINTA DOORASHADA

- Talaada, 8da Bisha 11aad (November)

GOOBAHA IYO SAACADAHA CODBIXINTA

- Si aad u hesho meesha aad ka codbixinayso, booqo mnvotes.org. Goobaha codbixinta badankoodu waxay furan yihiin laga bilaabo 7da subaxnimo ilaa 8da fiidnimo.

**ARAG TUSAALE AH
WARQADDAAD A CODBIXINTA:
mnvotes.gov**

More Information:

<https://dfl.org/voterprotection/> | <https://mnvotes.gov> | <https://iwillvote.com/>

1-833-DFL-VOTE